

UJEEDO:- CADDEYN BEEC AAN SAX AHEEN

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay **08/11/2022**, anigoo ah **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, ahna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheen ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

B- CADDEEYE: Anigoo ah **YUUSUF MAXAMED CABDULLE** Somali ah Hooyo: Xaliimo Cusmaan Axmed, Soomaali ah ku Dashay: Muqdisho, Sanadkii 1987, Sita Somali National ID: 28703053224373, Waxaan aniga oo Xiskayga iyo miyirkayguba taam yahay cid I qasbeysana aysan jirin Qowl iyo Ficilba in aan si buuxda ugu Caddeeyo Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble in Boos ku yaalla **Muqdisho** Degmada **Dayniile (Ex-wardhiigley)** Gaar ahaan Goofka Reer Maxamuud Ciise, Cabirkiisuna yahay **20X15-M**, Loto Lr: **5576**, Soohdintiisuna tahay **Bari Jid** Inta kale dhul dad **W.M.L: 41275/2012 Tr:20/05/2012**, uu yahay mid aan sax aheyn kana soo bixin Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble, oo laga been abuuray isla markaana ay tahay warqada aan wax ku milkiyey Mid aan Sharci aheyn oo waxba kama jiraan ah Milkiyadeeda.

Hadaba waxaan u caddeynayaa cid alaalle iyo Cida ay qusayso in aan ka noqday oo aan ka tanaasulay dhulka sare ku xasan iyo Sheegashadiisa isla markaana aan dib danbe u sheegan doonin Milkiyadiisa.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah **1-Xuubeey Cabdulle Culusoow, 2-Maxamuud Aadan Rooble 3-C/rashiid X. Cabdikariin Cabdi 4- Carfaaye Maxamed Yarrow**, waxaan qoraalkaan ku cadaynaynaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay Caddeynta Sare Ku xusan.

SAXIIXA CADDEEYAHA

YUUSUF MAXAMED CABDULLE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1-XUUBEY C/LLE CULUSOW 2-M/UD AADAN ROBLE 3-C/RASHIID X.C/KARIIN CABDI 4-CARFAYE M/ED AXMED

Rep. 412/TPN/2022

(CADDEYN TA NOOTAAYAHA)

Tr. 08/11/2022

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa **1- Yuusuf Maxamed Cabdulle** (ahna Caddeeyaha), iyo waliba Afarta Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin

NOOTAAYAHA

DR. MAXAMED C/LLAAHI MAXAMED "MAX'ED NOTAAYO"



MASAWIRKA CADEEYAHA

YUUSUF MAXAMED CABDULLE



MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA

XUUBEY CABDULLE CULUSOW



MAXAMUUD AADAN ROBLE



C\RASHIID X. C\KARIIN CABDI



CARFAAYE MAXAMED AXMED



JAMHUURIYADDA SOMAALIYA

جمهورية الصومال


SOMALI REPUBLIC

WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD

L. Qorankaal / رقم الهوية / National ID
28703053224373



Magaca / الاسم / Name

YUSUF
MOHAMED ABDOLE



Taariikhda dhalashada / الميلاد / Birth

05 Mar 1987 MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue

08 Aug 2022 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء / Expiry

07 Aug 2027

Lab / Dheddig / جنس / Gender

MALE





Ujeedo: Cadeyn ka noqosho Beec Dhul iyo tanaasulaad

Muqdisho maanta oo ay taariikhdu tahay 15/09/2022 Anigoo ah **Yuusuf Maxamed Cabdulle Cali** soomali ah hooyo tahay Xaliimo Cusmaan Axmed ku dhashay Muqdisho sanadkii 1987-dii dagan xamar lehna (**ID-ga warqadaan ku dhegan**) iyo tell 0619-133133, isla markaasna ka caafimaad qaba wax allaale iyo wixii wax u dhimi karaya maskaxda iyo jirka bini'aadamka cid i qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxaan si buuxda u cadeynayaa in aan ka noqday oo aan ka taansulay dhul boos ah oo ku yaala Degmada **Dayniile (Ex-wardhiigleey)** kana mid ah goofka **Reer Maxamuud Ciise**, Booskaas oo ka kooban cabir dhan **20X15-Mittir**, lotto L.5576, jahooyinkiisa kala yihiin: **Bari jid**, inta kale dhul dad, boos kaas oo aan ku gatay dukuminti aan sharci aheyn (Fake ah), waxaana mulkiyada booskaan yeeshay **Faadumo Muxumed Aaden** oo uu wakiil iyo goob-joog ka yahay **Yuusuf Aadan C/llaahi**, lehna Tell: 0615-587799, sidaas darteed waxa uu ii celiyay Yuusuf Aadan C/llaahi dhamaan wixii qarash ah oo iiga baxay dhulkaan oo dhan **\$1,500** (kun iyo shan boqol oo doollar), hadaba waxaan cadeynayaa in aan ka noqday oo aan ka tanaasulay dhulka sare ku qoran iyo sheegashadiisa, waxaana la ii celiyay dhamaan wixii qarash iiga baxay dhulkaan lacagtaas oo dhamaan gacanta la iiga wada saaray iyada oo aan waxba ka dhimaneyn, waxaana diyaar u ahay oo aan ogolahay in la baabi'yo dhamaan wixii dukuminti ee aan ku sheeganayay booskaan, wax dacwo iyo dood ahna kama qabo, waxaana cadeyntaan qoray anigoo maskaxdeydu iyo miyrkeyguba taam yihiin cid i qasabtayna aysan jirin qawl iyo ficilba. =

Anigoo ah Yuusuf Aadan C/llaahi Aadan waxaan cadeynayaa in aan u celiyay Yuusuf Maxamed Cabdulle Cali dhamaan wixii qarasha uga baxay dhulkaan sare ku qoran, waana aqbalay cadeyntaan, raalina waan ku ahay kuna qanacsanahay wax dacwo iyo dood ahna kama qabo, waxaana markhaatiyaal ka ah cadeyntaan raga hoos ku qoran.

Saxiixa Cadeeyaha

Yuusuf Maxamed Cabdulle Cali

Saxiixa loo cadeeyaha

Yuusuf Aadan C/llaahi Aadan

Saxiixa Markhaatiyaasha

- 1- Xuubeey Cabdulle Cuslusoo Tell: 0615-969297
- 2- Liibaan Daahir Maxamuud Tell: 0615-773248
- 3- C/rashiid X. C/kariim Cabdi Tell: 0615-504768

Xafiiska Nootaayo Banaadir Timocadde

Ref. **B214/110668/22**

Saxiixa la Sugay

Date: 15/09/2022

Anigoo ah xafiiska nootaayo banaadir Dr.C/raxman Maxamud Cali (Timocadde) ee ku yaala degmada wadajir agagaarka Km4, waxaan halkaan ku sugayaa in saxiixa sare ku qoran uu yahay kii dhabta ahaa ee Cadeeye Yuusuf Maxamed Cabdulle Cali iyo loo cadeeye Yuusuf Aadan C/llaahi Aadan iyo markhaatiyaasha sare ku qoran, waxayna ku saxiixeen xafiiska dhexdiisa iyadoo aan cidina qasbin qowl iyo ficilba raalina iskaga ah labada dhinacba, kadib markii ay iska akhriyeen fahmeena waxaan ku qoray oo ka saxiixay diiwaanka guud ee nootaayadda.

Xafiiska Nootaayo Banaadir Timocadde
Dr.C/raxmaan Maxamud Cali (Timocadde)

Cadeeye

Loo Cadeeye



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
 جمهورية الصومال
 SOMALI REPUBLIC
 WARAQADDA AQOONSIGA
 بطاقة الهوية
 IDENTITY CARD

L. Qaranka / National ID
 28703053224373

Magaca / الاسم / Name
 YUSUF
 MOHAMED ABDULE

Taariikhda dhalashada / المولد / Birth
 05 Mar 1987
 MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue
 08 Aug 2022
 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo / الاقضاء / Expiry
 07 Aug 2027


Lab / Dheddig / Gender
 MALE



IF.E.
 Dhulka warqadaan ku qoran waxa uu ku samystay Yuusuf Maxamed Cabdulle warqadda summadeedu tahay 41275/2012 ee Tr. 20/05/2012 kuna been ahay Dr. Saciid Cali Cosoble.
 Xafiiska Nootaayo Banaadir Timacade
 Dr. C/raxmaan Max'ud Cali Timacade



Markhaatiyaal





ADDA
IYA



جمهورية
الصومال

KA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDDO:- (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNICIPALE AH).
Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay Labaatanka Bisha May, ee Sanadka Labada kun toban & Labada.(20/05/2012.)Aniga Nootaaya Xamar Dr.Saciid Cali Cosoble,waxaa Xafiiskeyga kuyaal S/Bakaraha ee inta u dhaxaysa Shirk.D/shiil & Masjidka Abuu Hureyra iigu yimid iyaga oo soo heshiiyey ina weydiistey inaan u kala qoro heshiiskooda ujeeddada sare ku xusan dadka Soomaaliyeed ee hos ku kala caddeynaya sidatan:-

1-)Aniga oo ah (Axmed Xuseen Axmed) Waxaan heshiis kaan ku caddeynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyey kuna wareejiyay Yuusuf Maxamed Cabdulle, Booskii uu ku qornaa Muqtaar Axmed Cabdulle, Anigoo ku gaday w.wakaalad No.38332/2010, Tr.04/11/2010,Kana Soo Baxday Notayo Xamar ee Dr. Siciid Cali Cosoble. Booskaan oo ku yaal Xamar Degmada (W/leey) Kuna Milkiyay W.M.L.38013/2010, Tr,12/8/2010,Kana Soo Baxdey Nootaayo Xamar uuna Saxiixay Dr. Siciid Cali Cosoble, Booskaan oo wareegiisu dhan yahay (20X15.M) Lotto Lr.(5576-) Soohdimihiisuna kala yihiin Bari Jid, inta kale waa dhul dad. Wuxuuna iibsadaha booskaani iiga iibsaday lacag dhan USD. 500/\$.(Shan Boqol oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay). Waxaan kale oo aan caddeynayaa in booskaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjogsan kara heshiis kaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla booskaan. Waxii taariikhda sare ka bilowdana xuquuqda Milkiyada booskaani Faa'iidadiisa & waajibaadkiisa Canshuureedba waxuu u wareegay (Yuusuf Maxamed Cabdulle).

2-)Aniga oo ah Yuusuf Maxamed Cabdulle, Waxaan heshiis kaan dhankayga ku Caddeynayaa in iska iibiyah I dul geeyay booskaan afartiisa gees ee kala duwan oo waxba dhimaneyn aniguna aan ka gudoomay iska gadaha kuna qancay.

=SAXIIXA ISKA IIBIYAHA=
Axmed Xuseen Axmed.

=SAXIIXA IIBSADAHA=
Yuusuf Maxamed Cabdulle.

.....
Axmed Xuseen

= (SAXIIXYADA MARKHAATIYAASHA)=

1-)C/rashiid Xaaji C/kariin.

2-)Sh. Maxamed Axmed Xirsi.

Rep.41275/2012.

(CADDEYNTA NOOTAAYAHA.)

Tr.20/05/2012.

Aniga Nootaaya Xamar Dr.Saciid Cali Cosoble, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-)Axmed Xuseen Axmed, Hooyo/Shariifo Xasan,Ku dhashay Xamar, Sanadkii 1980,Kii, la sawiray xafiiskane laga yaqaan,(iska iibiye) 2-)Yuusuf Maxamed Cabdulle, Hooyo/Xaliimo Cismaan Axmed,Ku dhashay Muqdisho Sanadkii 1984,Kii, (iibsade) iyo waliba Labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka maragga ka caawiyey oo kala ah 1-)C/rashiid Xaaji C/kariin 2-)Sh.Maxamed Axmed Xirsi. Dadkani oo anigu aqonsadey hubiyeyna in magacyadas ayleeyihiin waxay heshiis kaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah.

BY. Maxamed.



=NOOTAAYAHA=
(Dr. Saciid Cali Cosoble)


FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 09/11/2022

Aniga oo ah **Maxamed Cabdullaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamed Cabdi Cali** isla markaana uu Geeyey Xafiiska Nootaayo Muqdisho (**Dr, Saciid Cali Cosoble**) Warqadaan oo ah Cadeyn Dukumiintiga aan Sax aheyn ahna aatadii **Original** Caddeynta **Rep No. 412/W.P.N/22, Tr. 08/11/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Nootaayo Muqdisho (Dr, Saciid Cali Cosoble)
Taariikhda Caddeynta	08/11/2022

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali**, Degan **Xamar Bile** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Nootaayo Muqdisho (Dr, Saciid Cali Cosoble)**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdullaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamed Cabdi Cali